

Baahiyaha Cuntada ee Adeegyada

Nafaqada Cunuga

Baahiyaha Gaarka ee Cuntada

Barnaamijyada Nafaqada Cunuga USDA waxay caawiyaan helida cuntooyin caafimaad qaba oo dhamaan caruurta la siiyo, oo ay ku jiraan caruurta naafada ah ee leh baahiyio gaara oo cunto. Naafada waxa lagu qayexaa laxaad la'aan taasoo xoog u xadida hawlaha muhiimka ee nolosha. Tani waxa ku jiri kara xaaladaha xasaasiyada iyo dheefshiidka. Haseyeeshee, kuma jiraan dookha gaarka.

Xaaladaha qaar, ardey leh baahiyio gaara wuxuu u baahan karaa [Qorshaha 504 Qeybta](#). La xiriir Iskuduwaha Qeybta 504 Degmadaada wixii macluumaad dheeriya.

Iyadoon la eegayn in ardeygu u baahan yahay qorshaha 504, maalgaliyayaasha Barnaamijyada Nafaqada Cunuga USDA waa inay raacaan tilmaamaha marka la siinayo ardey leh xaalado xasaasiyad ama dheefshiid. Wixii macluumaad dheeriya ee khuseeya shuruudahan, fadlan dib uga fiiri [Warqadayada Cuntada Baahiyaha Gaarka](#) ee dugsiyada degmada.

Sidee ayaan ugu Helaa Cunooyinka Gaarka ah cunugayga?

- La xiriir Agaasimaha Dugsiga Nafadada Degmada/Adeegea Cuntada si loo fuliyo gudbinta codsigaaga.
 - Codsiga waa inay ku jiraan:
 - Cuntada(yinka) laga reebayo/ilaalinayo cuntada cunuga.
 - Sida dheefshiidka cuntadu u saameynayo cunuga.
 - Cuntada(yinka) lagu badelaayo.
 - Saxeexa **Masuuliyiinka caafimaadka ee gobolku aqoonsan yahay** (khubaro daryeel caafimaad oo loo ogolaaday inay qoraan daawooyinka Washington) tusaale"
 - Dhakhtar Caafimaad (MD)
 - Dhaktarka Lafaha(DO)
 - Kalkaaliye Dhakhtar (PA) oo leh awood dawo qoris
 - Dhaktarka Cuntooyinka
 - Kalkaaliso Sare oo Diwaangashan (ARNP)
- Dugsigu **WUXUU** isticmaali [karaa foomka Codsiga Cuntooyinka gaarka ah](#), lakiin loogama baahna.

Siiwadida la shaqeysta dugsigaaga

- Xiriirka joogtada ah waa u daruuri daryeel joogto ah. Wakhtiyada lala xiriir karo dugsiga waxa ku jiri kara:
 - Baahiyaha cuntooyinka ee cusub.



- Xanibaadaha la cusbooneysiyyey (tusaale: cunugaagu muu awoodin inuu cuno tamaandho, lakiin wuu karaa).
- Su'aalaha ama walaacyada daryeelka cunugaaga.

Walaacyada iyo Cabashooyinka

Xafiiska Xuquuqda Shacabka (OCR) ee Waaxda Beeraha Mareykanka (USDA) wuxuu dhaqangalinaya shuruucda xuquuqda shacabka ee barnaamijyada fadaraalku maalgaliyo, wuxuuna mabnuucayaa takoorka dugsiyada dadweynaha sababo isir, midab, dhalasho, galmo, naaf, iyo da. U qor cabashooyinka OCR ee 180 maalmaha kadwalka (6 bilood) ee taariikhda takoorka lagu eeddeeyey.

- La xiriir degmada dugsigaaga [Iskuduwaha Qeypta 504](#) Haddii aad aamisan tahay in takoor dhacay.
- Booqo [Wabsaaydka Xafiiska Sinaanta iyo Xuquuqda Shacabka OSPI](#) wixii macluumaad dheeriya
- Isticmaal [Foomka Cabashada Takoorka Barnaamijka Xuquuqda Shacabka ee Kalkaaliyaha Xafiiska Xogyaha USDA](#) si aad u dacwootid.

Macluumaad dheeraad ah

- [Macluumaadka Xiriirkha Iskuduwaha 504](#)
- [504 Macluumaad Guud](#)
- [Su'aalaha iyo jawaabaha Xeerka 2008 ee Ardeyda Naafada ah](#)

Tixraac

- [Qeypta 504 ee Xeerka Dhaqancelinta](#)
- [Mansabka II iyo Mansabka III ee Xeerka Naafada Mareykanka \(ADA\)](#)
- [SP40-2017 2017 Soosaarista Meelaynta Caruurta Naafada ah ee Brnaamijyada Cuntada Dugsiga](#)
- [SP26-2017 Meelaynta Naafada Barnaamijyada Cuntada Dugsiga: Tilaamta iyo Q&As](#)
- [SP59-2016 Waxka badelka Meelaynta Barnaamijka Naafada Dugsiga](#)